

# Cagaarshowga B

## Waa maxay Cagaarshoow B?

Cagaarshoowga B waa cudur fayras ah oo weerara beerka wuxuuna keeni karaa juundaan (maqaarka iyo indhaha oo jaalle noqda). Inta badan dadka fayraska ayaa iskiis uga ba'a 6 bilood gudahood waxayna yeeshaan difaac ka dhan ah caabuq kasta oo cagaarshoowga B ah oo dheeri ah. Laakiin dadka qaar (ku dhawaad hal kamid ah tobankii qof ee uu ku dhaco Cagaarshoowga B ayaga oo dad waawayn ah) ayuu caabuqu jirkeedu kusii jiraa wuxuuna keeni karaa cirrhosis ama kansarka beerka muddo sanado ah kadib. Dabagalka ayaa sidaas awgeed muhiim ah si loo ogaado isbadellada ku dhacay beerka loona daaweyyo marka ay muhiim tahay.

Cagaarshoowga B ayaa looga hortagi karaa adeegsiga talaal badqab iyo waxtar leh.

## Yaa khatarta ugu badan ugu jira Cagaarshoowga B?

Cagaarshoow B waxa akeena fayras laga helo noocyoo badan oo dheecaanada jirka kamid ah, tusaale, dhididka, ilmada, calyada, shahwada iyo dheecaanka ka yimaada xubinta taranka haweenka laakiin dhiiga caabuqa sida ayaa ah qaabka ugu badan ee caabuqu iskaga gudbo labada qof. Tani waa sababta dadka qaar ay khatar dheeri ah ugu jiraan qaadista cudurka, tusaale,

- Ilmaha ay dhalaan hooyooyinka caabuqa qaba,
- Dadka qaba xanuunnada gaarka ah sida, xanuunka daran ee kalyaha, caabuqa HIV
- Dadka guriga iskula nool iyo lamaaneyaaasha galmeda la sameeya dadka caabuqa qaba.
- Qoysaska koriya ilmaha ka yimaada wadamada caabuqu ku badan yahay
- Dadka qaba naafada waxbarashada ee dhigta machadka.

## Waa maxay astaamaha Cagaarshoowga B?

Dadka qaar oo qaba nooca biloowga ah ee Cagaarshoowga B ayaan lahayn wax astaamo ah gebi ahaanba halka dadka kale ay qabi karaan xanuun daran kaasoo u baahan in qofka isbitaal al dhigo.

Astaamaha jiri kara waxaa kamid ah

- Juundaanka (maqaarka iyo indhaha oo jaalle noqda),
- Maqaar cuncun,
- Daal iyo tamar la'aan,
- Oomateed xumo iyo miisaan dhac,
- Shuban ama Matag,
- Xanuunka Kala goysyada

## **Waa maxay mudada uu qofka haynaayo Cagaarshoowga B?**

Xanuunka ayaa socon kara 2 ilaa 6 bilood kadib marka caabuqu qofka haleelo, caadiyan waxey qaadataa 2-3 bilood. Caabuqa ayaa qofka laga heli karaa kahor intuusan yeelan astaamaha waxeyna socon karaan dhawr bilood.

## **Sidee xanuunka Cagaarshoowga B ku biloowdaa?**

Dadka qaar ayuu fayrasku ku nagaan karaa jirkooda waxeyna noqdaan kuwo waligood qaba fayraska ayagoo markasta qaadsiin kara dadka kale. Wax kayar 10% dadka caabuqu ku dhaco ayagoo qaangaar ah iyo ku dhawaad 90% ilmaha uu yaraantooda ku dhaco ayaa lahaan doona caabuqa dabo dheeraada.

## **Waa sidee darnaanta Cagaarshoowga B?**

Caabuqa mudada dheer ee cagaarshoowga B ayaa keeni karta cudurka beerka. Tan ayaa keeni karta in qofku u dhibto kansarka beerka ama cirrhosis. Ku dhawaad 1 kamid ah 4 qof oo cudurka abadiyan u sida ayaa qaadi doonta cirrhosis ama kansarka beerka.

Cagaarshoowga B ayaa si gaar ah caabuq dabo dheeraada ku reeba ilmaha dhashay iyo carruurta yaryar.

## **Yay tahay Inuu qaato Talaalka Cagaarshoowga B?**

Cagaarshoowga B ayaa looga hortagi karaa talaal.

Talaalka Cagaarshoowga B ayaa la siiyaa carruurta ayadoo qayb ka ah 6 talaal oo ku wada jira 1 talaal markay jiraan 2, 4 iyo 6 bilood jir. Carruurta hooyooinkood ay qabaan caabuqa cagaarshoowga B waxaana sidoo kale lagu talinayaan inay qaataan talaalka hepB marka ay dhashaan.

6 talaal ee ku jira 1 talaal ayaa ka hortagaaya caabuqa ka dhasha cagaarshoowga B, teetanada, gawracatada, Hib (Jeermiska Hargabka b) jix-dheerta (Xiiqda) iyo dabaysha.

## **Yaa lagu talinayaan inuu inuu qaato Talaalka ka daba taga ah ee Cagaarshoowga B?**

Talaalka ayaa lagu talinayaan inay qaataan dadka ku jira kooxaha khatarta ugu jira caabuqa.

Gudiga Qaran ee Talo Bixinta Talaalka ayaan ku talinayn in talaalka ka daba taga ah la siiyo dadka aan kamid ahayn kooxaha khatarta ku jira.

## **Yay tahay Inuusan qaadan Talaalka Cagaarshoowga B?**

Waxaa jira dad dhawr ah oo ay tahay inaysan qaadan talaalka Cagaarshoowga B. Cunugaagu waa inuusan qaadan talaalka haddii uu xasaasiyad xun (anaphylaxis) ka qaaday talaalka hore ama qayb kamid ah talaalka.

## **Waxa aad filanayso marka aad qaadato talaalka Cagaarshoowga B?**

Talaalka cagaarshoowga B aad ayuu badqab u yahay. Ciladaha ugu badan waa xanuunka, gaduudashada iyo bararka meesha cirbada lagu dhuftay.

Marar dhif ah qandho, finan, daal iyo astaamo sida kuwa hargabka ah ayaa qofka qaban kara.

Haddii qofka doonaaya in la talaalo uu uur leeyahay ama uu aaminsan yahay inuu uur yeelan karo, waxaa haboon in arintaan lagala hadlo dhakhtarka qoyskaaga kahor intaadan qaadan talaalka.

## **Waa sidee saamaynta talaalka Cagaarshoowga B?**

98% carruurta ayaa hela difaac ka dhan ah Cagaarshoowga B kadib marka ay dhamaystaan koorsada talaalka lagu talinaayo.

## **Xagee ayaan ka helayaa xog dheeraad ah?**

La hadal xirfadle caafimaad oo aad ku kalsoon tahay oo booqo [www.immunisation.ie](http://www.immunisation.ie)